somaliska

Sharciyada ciyaaraha

Ciyaarta aad haatan ciyaari doontaan waxaa abuuray 12 dhallinyaro ah oo ku nool magaalada Sandviken, kuwaasoo intii lagu dhexjirey 2021-2024 ka shaqeynayey mashruuc la yiraa la ciyaar kooxda, halkaas oo lagu hal-abuuray ciyaar ujeedadeedu tahay in caruurta la baro xaqooda.

Ciyaarta waa mid laga wada qaybgelaayo, dadka ka qaybqaadanayana ay kooxo sida waddamo kala duwan noqonayaan,ujeedadooduna tahay in lanoqdo waddanka ugu fiican ee caruur ku noolaadaan, weyna wadashaqeynayaan wadanka dhexdiisa iyo dibadiisaba.

Mashruuca waxaa maalgelinaya hayàda dhaxal ururinta dadweynaha ( Allmänna Arvsfonden )waxaana fulinaya ururka la yiraa DramaMera.

**Ciyaarta waxaa ku jira:**

- 25 mitir oo laba jibaaran (kvadratmeter ) garoon weyn oo lagu ciyaaro oo loo qaybiyey afar khaanadood oo madow oo gees ku yaal, 16 khaanadood oo midab kala duwan leh
- Baliisha laadhuuga oo jaale ah oo weyn (tärning)
- Shey ciyaareed midabkiisu jaale yahay
- Afar qafis oo jaale ah, mid kasta hal waddan waxaana ku dhexjira :

Qalin midab leh (Tuschpenna)
Qalin caadi ah (Penna)
Buug yar oo wax lagu qoro (Anteckningsblock)
Liis qiimaha (Prislista)
3 miyan oo lacag ciyaareed ah (Barnoz)
Qoraal heshiiska xaquuqda caruurta( barnkonventionen)
Warqad qoraalka la yiraa (A4 papper)
Sharaxaada la yiraa (Rutförklaring)

- Hal qafis oo cad oo la siinayo hogaamiyayaasha ciyaarta oo ay ku jiraan:

Qoraal heshiiska xaquuqda caruurta( barnkonventionen)
Warbixin kooban waddamada
Liiska qiimaha (Prislista)
Saacada wakhtiga (Timer)
Liis la yiraa (Rutlista)
Lacag dheeraad ah (Extrapengar)
Qalin caadi ah (Penna)

Kaarar kala duwan oo loo isticmaalayo khaanadaha kala duwan ee midabka leh:
BULUUG (BLÅ):
Ururada ka shaqeeya xuquuqda caruurta
Waxyar oo ku saabsan dunida isbedeshey
Hawlo hal-abuur leh
Kaar hal xiraale ah
Kaar aan la aqoon

CAGAAR MUGDI AH (MÖRKGRÖN): War degdeg ah-kaar
CASAAN XIGEEN (LILA): kaarka ciyaarta
CAGAAR IFTIIMAYA (LJUSGRÖN): kaarka ciyaarta tilmaanta
CASAAN IFTIIN LEH (LJUSROSA): layli wadashaqeyneed

**Warbixin la raacayo:**
Garoonka ciyaartu waa 25 mitir oo laba jibaaran.Waa weyn yahay waxuuna u baahan yahay masaafo banaan oo weyn si loo ciyaaro ,in banaanka lagu ciyaaro waa wax fiican oo shaqeynaya.
Marka laga reebo masaafada lagu ciyaarayo waxaa wanaagsan haddii aad haysataan banaan ku wareegsan meesha lagu ciyaarayo si aad dhaqdhaqaaq u samayn kartaan.
Talo ahaan waxaa fiican ka qaybgalayaal 12-16, laba ciyaar hogaamiye ayaa loo baahan yahay.
Goob wax la dhigto, tusaale miis ay hogaamiyayaasha ciyaaruhu alaabta dhigan karaan ayaa loo baahan yahay.
Wakhtiga ciyaartu waa 60 daqiiqo laga bilaabo kolka baliisha laadhuuga ugu horaysa la tuuro.

**Inta aan ciyaartu bilaaban:**

*Inta aan ka qaybgalayaashu iman:*
Hogaamiyayaasha ciyaaraha ayaa qalabaynaya garoonka lagu ciyaarayo,Khaanadaha midibka leh waxaa loo dhigayaa hadba qofku sida uu doonaayo,balse kuwa waaweyn ee madow ayaa la dhigayaa gees walba, inta u dhexaysa geesahana waa ilaa afar khaanadood.
Eeg sawirka garoonka ciyaarta.
Diyaari, waxa ku jira khaanada cad, waana inaad u diyaarisaa qaab u sahlan hogaamiyayaasha ciyaarta.

*Marka ka qaybgalayaashu soo galaan:*
Sharaxaad ka bixi in ciyaarta soogaabinteedu ay u taagan tahay Wadashaqeyn ka dhexaysa waddamo, waxayna ka hadlaysaa in la barto xuquuqda caruurta.

Si aad u samaysaan waxaad u ciyaareysaan sidii waddamo kala duwan, adinkoo ka dhigayaa waddankaaga midka ugu fiican ee caruur ku noolaan karto.
Sharax in ciyaarta la ciyaarayo 60 daqiiqo , waddamada oo dhana ay isticmaalayaan nooc ciyaareed isku mid ah, 60 daqiiqo , ciyaartana waa in la sameeyaa hawlo kala duwan,mararka qaar wadanka dhexdiisa, marar kalena waxaa la kaashanayaa waddamada kale.

Hogaamiyayaasha ciyaaraha ayaa ka qaybgalayaasha u kala qaybinaaya afar kooxood iyagoo koox walba ku meelaynaaya khaanad gees ah ka dibna qafis jaale ah siinaya waddan walba si loo eego waxa ku jira qasnada (eeg kor).

Ka dib hogaamiyayaasha ciyaarta ayaa qaybinaaya kaar waddan ( Landkort) oo siinaya waddan walba, iyadoo laga codsnaayo in waddan walbaa qoraalka kaarka ku qoran akhriyo ka dibna lagu qoro magaca waddanka walba (A4-papper) ka dibna la dhigo meel laga arko oo khaanada madow ah.

Waddamada ayaa soo koobaya sharaxaada laga bixiyey , ka dibna waddamada kale kor u akhrinaaya,  wakhti yar ka dibna la akhrinayaayo liiska qiimaha , iyadoo laga fekeraayo 3 shey oo qof kastaa u iibiyo waddankiisa.

Markii waddamada oo dhan ay diyaar noqdaan ayey hogaamiyayaasha ciyaaruhu wareegayaan oo hubinayaan si qolo walbaa u ogaato waxa ay iibsadeen.

Waddan walbaa waxuu ka dib tuurayaa baliisha laadhuuga, ka dib waddanka hela tirada ugu saraysa ayaa bilaabaya ciyaarta.

**Ciyaarta ayaa bilaabanaysa:**
Waddanka hela tirada ugu saraysa ayaa ku bilaabaya inuu tuuro baliisha laadhuuga, ka dibna waxaa uu goobta ciyaarta ku tilaabsanayaa tirada ay baliisha laadhuugu muujiso. Ogow khaanadaha madow ee waaweyn laguma  tirinaayo.

Waddanka tuura baliisha laadhuuga ayaa guuraaya ciyaarta in la mid ah oo talaabo ee baliisha laadhugu muujiso. Waddanku waxaa uu degayaa khaanad , ka dib hogaamiyaha ciyaarta ayaa ka warbixinaya waxa ka dhacaya halkaas.Eeg sharaxaada midabada kala duwan ee warqadan.
Waddamada oo dhami isku hawl ayey qabanayaan, waxayna usoo bandhigayaan iyaga naftooda iyo hogaamiyayaasha ciyaaraha.
Kolka hawsha la dhameeyo, ayaa ciyaartu aadaysaa waddanka ku xiga, sidaas ayeyna ku soconeysaa.
Ciyaartu waxaa ay soconeysaa ilaa ay 60 daqiiqo dhamaato. Intaas ka dibna hogaamiyayaasha ciyaarta ayaa wareegaya si ay u hubiyaan waddan walbaa inta uu helay. Hogaamiyayaasha ciyaarta ayaa ka dib isugeynaya waddan kastaa inta uu helay si ay koox walba ugu sheegaan inta ay ku guuleysteen iney ka iibsadeen liiska qiimaha ka dibna ay waddankooda ka dhigaan mid ku fiican iney caruur ku noolaadaan!

somaliska

Sharaxaada khaanada

| | |
|---|---|
| | Waddamada<br>Koox walbaa waxay ciyaari ciyaarta waddan la hindisey. Waddanka waxuu leeyahay wax uu higsanaayo kolka laga hadlaayo xuquuqda caruurta |
| **DHEEMAN YAR** | Dhamaan waddamada waa iney wax u iibiyaan waddankooda |
| **DHEEMAN DHEXE** | Dhamaan waddamadu waa iney laba shey u iibiyaan waddankooda |
| **DHEEMAN WEYN** | Dhamaan waddamadu wa iney saddex shey u iibiyaan waddankooda |
| | Hawlo hal-abuur<br>Waddamada oo dhan waxay fulinayaan hawl isku mid ah<br>Ka dib shaqo la fuliyey, qaado kaar aan la aqoon |
| ?? | Hal xiraale<br>Wadan walbaa waxaa uu ka jawaabayaa saddex suàalood<br>Jawaabta suáalaha waxaa laga helayaa warqada  sharciga xuquuqda caruurta |
| | War degdeg ah!<br>Waxaad heleysaan( Barnoz) ama waxaa dhiibeysaan ( Barnoz)! |
| | Ciyaar<br>Dhamaan caruurtu waxay xaq u leeyihiin iney ciyaaraan markaa waa samayneynaa! |
| | Ciyaar wax la tilmaamayo!<br>Hogaamiyayaasha ciyaarta ayaa soo bixinaya hal kaar ka dib waxaa la muujin tilmaan, wadddamada oo dhan wey qiyaasayaan cutubka laga hadlaayo.<br>Jawaabta waxay ku jiraa warqada- BK |
| | Layli wadashaqeyneed<br>Dhamaan wadamadu waa isla shaqeynayaan! |

Waddan: Malvaya
Waddankaaga waxaa xakuma boqor xukun adag oo taajir ah. Dadka intooda kalena waa waa sabool. Dadka waaweyn waa iney si aad ah u shaqeeyaan si ay u helaan lacag ay ku iibsadaan cunto , una helaan meel ay ku noolaadaan.Waalidku waa inuu bixiyaa dharka isu eg ( skoluniformer) ee ay iskuulka ku aadaan, buuggaagta iskuulka, haddii kale waa in aanay curuurtu iskuul dhigan.Qoysas badan ayaa doortay iney isla noolaadaan si ay noloshu ugu noqoto mid raqiis ah, laakiin waxay u nool yihiin si cidhiidhi ah.

Waddan: Ayanado
Madaxweynaha waddankan waxuu doonayaa in waddanku noqdo midka ugu fiican aduunka.Dhamaan caruurta iskuulka dhigtaa waa iney helaan shahaadada ugu sareysa. Iskuulku waa lacag laàan, ardayda hela shahaadooyinka ugu fiican waxaa abaalmarin loo siiyaa kombiyuutero. Ma jiraan wax dad waaweyn ah oo fahmaaya in caruurtu dareemayaan cadaadis.Sidaa darteed waxaa jira arday badan oo ka tirsan waddankan Ayanado oo diidey iney iskuulka tagaan.

Waddan: Hemroza
Waddankaaga waaalid ayaa aaminsan iney iyagu wax walba si fiican u ogsoon yihiin,waxay goàansadaan saaxiibada caruurtu yeelanayaan,dharka ay xiranayaan iyo waxyaalaha wakhtiga firaaqada la qabto ee ay ka qayb qaadanayaan. Caruurtu ma helaan wax fursad ah oo fikirkooda iyo aragtidooda ku wajahan noloshooda ay ku dhiibtaan. Macallimiin badan ayaa isku deyey iney dhibtaas kala hadlaan waalidiinta , laakiin waalidka ayaa diidey iney dhegeystaan.

Waddan: Qudo
Waddankaaga , dhamaan waxaa lagu nool yahay beeraha,sida uu sheegaayo dhaqan hore waa in dhamaan cidiyaha la marsadaa ranji cagaar ah si ay usoo baxaan qudaar badan.Ranjiga cagaarka ah ee cidiyaha la mariyaa waa mid sun ah, waxayna dhaqaatiirtu ku taliyeen in dadka u dhashay Qudo ay joojiyaan.Laakiin dadka waaweyn maaha kuwo dhegeysanaaya, waxayna sii wataan isticmaalka ranjiga cagaaran ee cidiyaha la marsado.

Waddan : Sullala
Waddanka  Sullala waxaa mamnuuc ah in la aaminsanaado waxa diin ah.Waa inaan la tukan ama aaney dadku la hadlin ilaahyadooda.Waddankan caruurtu aad ayey u niyad xun yihiin maxaa yeelay waxaa loo diidey in dabaaldegaan wakhtiga ciidaha ah.Waxaa loo diiday iney qaadaan heeso diineedyo,ama iney salaad igu yimaadaan. Sidaa darteed dad badan ayaa si qarsoodi ah ku tukada, haddiise booliisku ogaado waa la xirayaa.

Waddan: Ellayha
Waddanka Ellayha waxaa ku dhasha caruur badan oo leh timo iskumaran,dadka leh timaha toosana waxaa la rumaysan yahay iney kasoo jeedaan xayawaan xun. Sidaa darteed caruurta iyo dadka waaweyn ee leh timaha toosan,waa lagu takooraa iskuulka iyo goobaha shaqada.
Hadda waxaa dowladu goàansatay in la caawino muwaadiniinta leh timaha toosan, laakiin dadka kale ee waddanka jooga ayaa kasoo horjeeda, waana ay mudaaharaadaan maalin walba.

Waddan: Alinia
Waddankaagu waxuu leeyahay dhul aad u qurux badan,laakiin inta ugu badan dadka waaweyn ee waddankaaga waxay ka shaqeeyaan wershadaha waaweyn kuwaasoo siidaaya qashin hawada gala kaasoo sumeeya dhulka quruxda badan. Qashinka wasakhaysan ee wershaduhu soo daayaan waxuu dhaliyaa kuleyl xad-dhaaf ah ,mararka qaarkoodna waxay dhaliyaan roob badan. Wakhtiyadii ugu dameeyey waxaa daày roobab badan kuwaasoo dhaliyey daadad badan, taasoo keentay in caruurtu iskuul aadi waayaan.

Waddan: Rozato
Boqorka Rozato waxuu lacag ka helaa waddamo kale haddii uu u ogolaado iney qashinka ku tuuraan waddankaaga.Qashin ayaa yaal meel walba, kaynta, xeebaha iyo jidadka. Qashinkii oo sida buur noqday ayaa kordhaya , dhirta iyo xayawaanka ayaa dhimanaya.Biyaha ayaa sumoobay, suurtagalna maaha in la cabi karo, ama lagu qubeysto, intaa waxaa dheer in ur aad u xun uu kasoo baxaayo.Sidaa darteed waalidiinta ayaa doortay iney caruurtooda ku haystaan guryaha oo aanay aadin iskuul.

Waddan: Ayosho
Waddankaaga waxaa mamnuuc ah in gabdhuhu iskuul dhigtaan, waajibaadkooda ugu horeeyana waa iney guriga dhaqaan, cuntada kariyaan.Aabayaashooda ayaa goàamiya wax walba, mararka qaarkoodna hablaha looma ogola iney la kulmaan saaxiibadood.Inta badan gabdhaha waxaa loo guuriyaa niman aanay dooneynin.

Waddan: Mitokoroto
Waddankaaga dadka oo dhan waxay wataan baabuur, laakiin baabuurta jooga Mitokoroto waxay soo daayaan kaarboon aad u badan taasoo hawada ka dhigta madow ciiro ah, waana khatar in lagu neefsado.Dowladu waxay dooneysaa in dadku raacaan basas iyo tareeno, laakiin maadaama ay kasii qaalisan tahay waxay doortaan iney baabuur raacaan.

Waddan: Jonjolito
Waddankaaga waxay dad badani rumaysan yihiin ”Qoraalkii weynaa”, kuwa aan rumaysneyn ”Qoraalka weyn” si xun ayaa loola dhaqmaa.Dadka waaweyn ee aan rumaysneyn waxaa ku adag iney shaqo helaan, caruurtuna shahaado hoose ayey helaan. Waxay maqleen iney wax ka wanaagsan ka helayaan waddamada kale.Dad badan waxay ka fekerayaan iney ka guuraan Jonjolito.

Waddan: Khadrata

Waddankaaga waxuu leeyahay maktabado badan laakiin madaxweynaha  Khadrata ayaa goáansaday iney yaalaan oo keliya buuggaagta ay iyada qortay,dadka dhamaantoodna waxay ku khasban yihiin iney akhristaan. Dhamaan dadka waddankana waxay ku khasban yihiin iney ku hadlaan oo keliya luuqada khadratiska inkastoo ay joogaan dad badan oo ku hadla luuqado kale.

BULLUG
Hawl leh hal-abuur

Ka feker qof male-awaal ah.Waxuu noqonayaa ilmo kasoo jeeda waddankaaga, kaasoo idiin sameeyey wax wanaagsan haddii aad tihiin dadka waddankaas ku nool. Ka dib waad nooga sheekeyn ilmahaas, hogaamiyayaasha ayaan suáalo kusaabsan ilmaha ku weydiin doona.

Caruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin iney ciyaaraan oo farxaan.Noo sheeg ciyaar sahlan oo aad jeceshahay inaad ciyaarto.

Qof weyn oo deriska ah oo aad taqaanaan ayaa dhihi jirey: ”Markaan yaraa ee aanan caqli badnayn weligay ma aanan haysan jirin koofiyad kolkii uu qabow banaanka ka jiro.Hadda waxaan ahay qof weyn oo caqli leh, mana dhacayso inaan baxo koofiyad laàan kolka sidan oo kale ay qabow tahay!” Ma ku raacsan tihiin deriska in dhallinyaranimadu tahay nacasnimo halka waayeelnimadu tahay caqli?

Qor gabay (qoraal gaaban) kaasoo ku saabsan in caruurtu xaq u leeyihiin iney gudbiyaan fikirkooda iyo waxa ay ku fekerayaan, waxaa la yiraahdaa xoriyada hadalka taasoo ah sharci ka ah Iswiidhan.

Waxaad akhrin doontaan sheeko gaaban oo ku saabsan ilmo kaasoo wax wanaagsan u sameeyey dunida.Dooro shey aad isleedahay waa mid muhiim u ah dunida, ka dib annaga nooga waran.

Taalo ka samee jirkiina, waxaa weeye waxaad istaageysaan meel adinkoo wadajira , waxyarna taagnaada adinkood is dhaqaajineynin oo aamusan.Taaladu waxay muujineysaa waxii aad ka bedeleysaan wadankiina.Dadkayaga kale waxaa qiyaaseynaa waxa aad natustaan.

Ka feker xaalad, halkaasoo qof weyn uu jebiyey mid ka mid ah shuruucda caalamiga ah ee caruurta difaacda. Isticmaal warqada uu ku qoran yahay shuruucda difaaca caruurta si caawinaad aad u hesho. Kolkii aad ka fekertaan marxalad, tus adigoo isticmaalaya taalo, iyadoo taalo laga qaabaynaayo jirkiina. Taas waxaa laga wadaa inaad qaadataan boos adinkoo wadajira in yar taagnaada adinkoo aamusan oo aan dhaqdhaqaaqeynin. Hogaamiyayaasha ayaa qiyaasaya waxa taaladu ku saabsan tahay.

Waxaad abuurtaa sheeko, ku saabsan wadan lagu riyoodo oo u fiican caruurta,wadan aan jirin, balse aad jeclaan lahaydeen inuu jiro.Sheekada ku bilow eryga ”Beri baa waxaa jirey....” kuna dhamaystir kelmadaha ah (Snipp, snapp, snut) sheekadii waa dhamaatay .” Waxaad noo akhrineysaan sheekada.

Dhamaan waa in la ogaadaa caruurta xaqooda,
si aan qofna dhib ugu imaanin.
Ku celceli qoraal ah xaqa ay caruurtu u leeyihiin
Iney ciyaaraan
Waalidkuna taas inuu shaki ka galo maaha.

Waxaad akhrineysaan sharaxaad ku saabsan urur ka shaqeeya in xaalada caruurtu hagaagto. Ka feker oo sawir astaan (logga) kaas oo ku haboon ururka. Ka dib waxaad ka hadlaysaan fikirkiina, markaas ka dib ayaad astaanta tuseysaan dadka kale.

Sawirka waxa aad ku aragtaan ilmo, kaasoo deganaanka u dareemaya qof weyn.Sawirka eeg wakhti yar.Ka dibna adinka waddanka jooga islahadla, kana hadla suàashaan: Waxaad isleedihiin in qof weyn qaban karo si ilmo u dareemo xasilooni? Ka dibna nooga waran waxa aad ka hadasheen.

Waxaad dooneysaan inaad samaysaan mudaaharaad si kor ugu  soo qaadaan xaalada caruurta ee waddankiina.Si wadajir ah u goàansada halkudhiga ku qornaan doona tabeelaha mudaaharaada. Ka dib ku qor warqada cabirkeedu yahay (A4-papper) ka dibna intayada kale natusa. Xasuusnow in la wada shaqeeyo.

## WAX IS WEYDIIN - Su`aalo

1. Imisa mowduuc ayuu ka kooban yahay heshiiska caalamiga ee xuququda caruurta?
2. Sida uu sheegaayo sharciga xuquuqda caruurta, ilaa wakhti ayaa qofka lagu tiriyaa caruurnimo, waa da`dee?
3. Dadka waaweyn ma goàamin karaan diinta ilmuhu qaadanayo?
4. Caruurtee ayuu quseeya sharciga xuquuqda caruurta?
5. Muxuu yahay sharciga xuquuqda caruurta?
6. Waa kuwee dadka waaweyn ee leh masuuliyada xuquuda caruurta?
7. Haddii ilmuhu uu leeyahay laba waalid,hal waalid ma ula guuri karaa ilmaha waddan kale, iyadoo aan waalidkii kale sidaa dooneynin?
8. Caruurta oo dhami ma leeyihiin xuquuda hadalka? Taasoo ah iney fikirkooda iyo aragtidooda dhiiban karaan?
9. Dadka waaweyn ma akhrin karaan xasuus qorka ilmaha , fariimaha danabaysan ( sms) warqad sanduuqa dhinaca internet , iyadoo aan ilmuhu ogeyn, oo aanu dhihin waa hagaag?
10. Caruurtu xaq ma u leeyihiin iney ciyaaraan?
11. Haddii uu ilmo shaqeeyo (tusaale ahaan wakhtiga xagaaga ama inuu shaqeeyo (maalmaha fasaxa ah ),Yaa la siinayaa mushaharkaas , waalidka mise waalidka ?
12. Ilmaha waalidkiis kharash intee leèg ayuu bixinayaa si uu u dhigto dugsiga hoose dhexe (laga bilaabo fasalka ciyaarta ilaa fasalka 9)?
13. Haddii qof weyn, tusaale ahaan macallin,ay la tahay in magaciisa la xusuusto,qofka waalidka ahi ma helayaa magac kale oo fiican. Tusaale ahaan haddii macalin yiraahdo magaca ilmuhu waa adag yahay lamana qaban karo, kolkaa qofka weyni magaca kale ma u alifi karaa

## JAWAAB SUÁALAHA

1. Sharciga xuquuqda caruurta waxuu ka kooban yahay  54 mowduuc

2. Sida uu dhigaayo sharciga xuquuqda caruurta, caruurtu waa ilmo ilaa ay ka buuxinayaan da` da 18 jir (curubka 1)

3. Maya,adiga ayaa goàansanaya diinta aad rabtid inaad qaadatid ama haddii aad dooneysid in aadan wax diin ahba qaadan  (cutubka 14)

4. Sharciga xuquuqda caruurta waxuu quseeyaa dhamaan caruurta jooga waddan iyadoo aan loo eegeynin halka ay kasoo jeedaan (Cutubka l 2)

5. Liis ku saabsan xaquuqda caruurta ayaa quseeya dhamaan caruurta.Dadka waaweyn ayaa laga doonayaa iney suurtogeliyaan in sharcigaas la raaco.

6. Caruurta waalidiintooda/waalidka/ama masuul waa qofka haya masuuliyada ugu weyn ee ilmaha. Mararka qaarkood waxay u baahan karaan caawinaad. (cutubka 18)

7. Maya, haddii ilmuhu leeyahay laba waalid waa iney labaduba ogolaadaan. (cutubka11)

8. Haa, caruurta oo dhami waxay leeyihiin xornimada hadalka (iney gudbiyaan aragtidooda iyo waxay ku fekerayaan ). Caruurtu waxay gudbin karaan fikirkood iyagoo isticmaala qoraal, hadal, sawir, muusikada, akhris Iwm. (ctubka 13)

9. Maya,Caruurtu xaq ayey u leeyihiin nolol gaar ah. (cutubka 16)

10. Haa, caruurta oo dhan xaq ayey u leeyihiin iney ciyaaraan, nastaan,wakhti firaaqo ahna ay helaan, tusaale iney isboorti sameeyaan ama qoobka ciyaar sameeyaan. (cutubka 31)

11. Haddii ilmuhu shaqeeyo, ilmaha ayaa la siinayaa lacagta  (cutubka 32)

12. Dhamaan caruurtu xaq ayey u leeyihiin iney dhigtaan dugsi hoose/dhexe, waalidiinta caruurtuna uma baahna iney bixiyaan wax kharasha ah (cutubka 28)

13. Maya, dhamaan caruurta waxay xaq u leeyihiin magacyadooda. (cutubka 7)

BULUUG
Kaarka aan la garaneynin

Marka xiga ee ciyaartu ku dhacdo dheeman (diamant) waa laydinka mamnuucay inaad wax iibsataan.

Marka xiga ee ciyaartu ku dhacdo dheeman (diamant) waxaad iibsan kartaan laba shey

Waa inaad soo celisaan shey aad iibsateen!

Kaarka weyn (Megakort)!
Marka xiga ee ciyaartu ku dhacdo dheeman (diamant) waxaad iibsanaysaan afar shey.

Waxaad heleysaan 200 000 Lacagta (Barnoz!)

Waxaad heleysaan 400 000 Lacagta (Barnoz!)

Waa inaad dib usoo celisaan 200 000 Lacagta (Barnoz!)

Waa inaad dib usoo celisaan hal shey oo aad iibsateen!

Dheemanta yar
Hambalyo!
Dheemanta yar waxay waddan walba siineysaa fursad uu ku iibsado hal shey oo waddankaaga looga baahan yahay !
Haddii ay muuqato in waddamo badan ay hal shey wada iibsanayaan balse aanay meesha inta taala aanay ku filneyn dadka dhamaan, waa in waddamada ay isla hadlaan ka dibna ay si uun xal ula yimaadaan.
Hogaamiyayaasha ayaa laga doonayaa in waddamadu si nabad ah xal ku gaaraan.
Nasiib wanaagsan!

Dheemanta dhexe
Hambalyo!
Dheemanta dhexe waxay dhamaan waddamada siineysaa fursad ay ku iibsadaan laba shey oo ay waddankooda uga baahan yihiin!
Haddii ay muuqato in waddamo badani doonayaan iney hal shey wada iibsadaan balse aanay meesha inta taala aanay ku filneyn dadka dhamaan, waa in waddamada ay isla hadlaan ka dibna ay si uun xal ula yimaadaan.
Hogaamiyayaasha ayaa laga doonayaa in waddamadu si nabad ah xal ku gaaraan.
Nasiib wanaagsan!

Dheemanta weyn
Hambalyo!
Dheemanta meeldhexaadka ah waxay waddamada oo dhan siineysaa fursad ay ku iibsadaan laba shey oo ay waddankooda looga baahan yahay !

Haddii ay muuqato in waddamo badani doonayaan iney hal shey wada iibsadaan balse aanay meesha inta taala aanay ku filneyn dadka dhamaan, waa in waddamada ay isla hadlaan ka dibna ay si uun xal ula yimaadaan.
Hogaamiyayaasha ayaa laga doonayaa in waddamadu si nabad ah xal ku gaaraan.
Nasiib wanaagsan!

CASAAN KHAFIIF
Ku tababarasho wadashaqeyn

Qaab sawir (tavla) ku sameeya jirkiina!
Dhamaantiin si wareegsan u istaaga ,markiiba halqof ha galo wareega hana dheho ”aniga waxaan....” hana sameeyo taalo aan dhaqdhaqaaqeyn oo aamusan isagoo isticmaalaya jirkiisa . Taaladu waxay ciwaan ahaan wadataa caruurta waxa u fiican (Tusaale ”Waxaan ahay iskuul”). Markii qofka kowaad diyaar noqdo booskiisii ayuu taagnaanayaa oo qof kale ayaa sii wadi doona. Dhamaan dadka waxay ku sugnaan doonaan boosaskooda ilaa dhamaan taalooyinka la sameeyo.
Dhamaantiin waxaad sameysaan qaab sawireed ( tavla)!

4 gees
Xirfadee ayaa caruurta ugu muhiimsan?
Hogaamiyaha ciyaarta ayaa khaanadaha madow u qaybinaaya afar gees oo kala duwan:
1. Macallin
2. Booliis
3. Dhakhtar
4. Xirfad kale

Ka qaybgalayaasha ayaa waxay haatan dooranayaan gees, meeshaas ayey istaagayaan iyagoo la jira kuwa kale ee iyaguna geeskaa la mid ah taagan , ka dib waxay ka wada hadlayaan sababta ay u doorteen xirfadaas.Ka dibna waxay la hadlayaan ka qaybgalayaasha kale ka dibna waxay hogaamiyayaasha ciyaarta weydiinayaan haddii uu jiro qof doonaya inuu geeska uu taagan yahay bedesho.

Abuur urur xuquuqda caruurta ka shaqeeya!
Dhamaan waddamadiinu waxay kusugan yihiin dhibaatooyin kala duwan,si wadajir ah u abuura hadda urur ka shaqeeya xuquuqda caruurta, ka dibna ku heshiiya waxii aad waddankaaga kaga shaqeyn lahayd .Ururka magaciisu muxuu noqonayaa? Muxuu ka shaqeynayaa? Xasuusnow inaad wada shaqeysaan.

Xuquuqdee ayaa maqan?
Maxaad u maleyneysaan iney ka maqan tahay sharciga xuquuda caruurta? Baar qoraalka sharciga xaquuqda caruurta ka dibna waddamadiina waa inaad isla hadashaan. Ka dibna kala hadla waddamada kale , intaas ka dib isku raaca cutub aad ku dari lahaydeen shuruucda haatan ku qoran xuquuqda caruurta.
Xasuusnaada inaad wada shaqeysaan.

Ku deeq lacag!
Hogaamiyaha ciyaarta ayaa soo saaraya kaar uu ku qoran yahay wadan kaasoo aan ku jirin kal-ciyaareedka, waana la sharaxayaa. Dhamaan afarta wadan ayaa kolkaa ka dib ku heshiinaya lacagta loo baahan yahay in lagu caawino dalkaas si loo xaliyo dhibta halkaa ka jirta.
Lacag isleèg ayaa maqal -lacageedka waddan walba laga qaadayaa.
Xasuusnaada inaad wada shaqeysaan.

MIDABKA ISKUJIRKA AH
Ciyaaro

1-7
Dhamaan ka qaybgalayaashu waxay istaagayaan wareeg.
Qof ayaa soo gudbinaaya lambarka1 isagoo oranaaya 1 isla markaasna uu calaacasha midigta saaraya garabka bidixda ama calaacasha bidixda saaraya garabka midigta taasoo ku xiran hadba dhinaca lambarka loo diraayo.
Haddii loo diro dhinaca midig waxaa qaadanaya qofka dhinaca midig ugu dhow, oo dhehaya 2 isla markaasna saaraya calaacasha garabka midigta ama bidixda oo sii diraaya 2:`da. Qofka hela 2:`da ayaa sii diraaya.
Waxay soconeysaa ilaa inta lambarka 7 la gaarayo, markaa bedelka in garabka lagu muujiyo dhinaca lambarka loo diraayo, markaan gacanta ayaa la saarayaa madaxa waxaan ala oranayaa 7, dhinaca faraha ay jiraan , xagaas ayaa loo dirayaa lambarka.
Marka lambarka 7 ayaa waxaa bilaabanaya waxa ku saabsana lambarka 1.
Haddii qof ka qaybgale ahi la waayo meesha la beegsanayo oo uu wax qalad ah yiraa ama qalad sameeyo waa inuu si degdeg ah ku baxaa ama uu ordaa hal wareeg.

Abiteyda -Ulla (Drak-Ulla)
Dhamaan kolka laga reebo hal ka qaybgale waxaa la istaagayaa wareeg, qof ayaa dhexda istaagaya ,gacmaha ayuu fudinayaa isagoo ka dhigaaya ”qaab” si ay u noqoto abiteyda-Ulla.
Abiteyda -Ulla waxay si degan u aadeysaa qof ku jira wareega oo ay isku deyeysaa iney qabato.Si aan loo qaban waa in qofku ku dhawaaqaa magaca dadka kale ee wareega ku sugan, kolkaas ayaa abitey-Ulla jihada bedelanaysaa, ayana qabanayesaa qofkaas kale bedelkiisa.
Haddii qof la qabto waxuu noqonayaa abitey-Ulla (Drak-Ulla).

Ciyaarta (Hi haj ho)!
Dhamaan ka qaybgalayaashu waxay istaagayaa wareega.
Qof ayaa ciyaarta ku bilaabaya Inuu qof kale eego, oo ku dhawaaqo HI isagoo isla markaasna tilmaamaya qofka, isagoo fidinaya oo madaxa dhaafsiinaya una qaabaynaya sidii falaar/.

Qofka hela HI (qofka la tilmaamo) ayaa markaas ku dhawaaqaya HAJ isagoo isla markaasna tilmaamaya qofka, isagoo fidinaya oo madaxa dhaafsiinaya una qaabaynaya sidii falaar/.

Dadka ugu dhow ee dhinacyada xiga ayaa ku dhawaaqaya HAJ waxay gacmaha u qaabaynayaa sidii falaar waxayna ku tilmaamayaan dhinaca qofkii ku dhawaaqay HAJ iyadoo isla markaas lagu dhawaaqayo HO.
Qofka ku dhawaaqay HAJ ayaa fiirinaya qof kale oo cusub ,kuna dhawaaqaya HI Iwm.

Haddii qof qaldo ciyaarta wuu ka baxayaa kooxda.

Dhamaan ka qaybgalayaashu waxay istaagnaanayaan meel isku mid ah iyagoon dhaqaaqin , ciyaartuna waa soconeysaa ilaa laba qof soo haraan, waxaana lagu soo afjarayaa tartan ka dhexeeya labadaas qof.

Labada qof wey istaagayaan iyagoo dhabarka isu jeedinaaya, kooxda ayaa soo saaraysa qofkii tartanka hogaamin lahaa.Hogaamiyuhu waxuu tusaale ahaan oranayaa bilo kala duwan , ka dibna labada qof ee tartamaya ayaa talaabo horay usoo qaadaya bil walba. Haddise hogaamiyuhu yiraa , tusaale ahaan maalin usbuuca ka mid ah , waa iney si degdeg ah isu gu soo jeensadaan -qofkii ugu horeeya ee soo jeensda ayaa guuleystey.

Ciyaarta Qudrat

Dhamaan ka qaybgalayaasha ayaa istaagaya wareeg weyn kolka laga reebo hal qof oo istaagaya bartamaha.
Qofka bartamaha istaagan waxuu isku qabanayaa indhaha (halkaan waxaa la isticmaali karaa indho-xir haddii taasi sahlan tahay).
Qofka bartamaha taagan ayaa si kor ah u dhehaaya SOCO (GÅ)!
Dhamaan dadka wareega ku jira ayaa bilaabaya iney wareegaan.
Qofka bartanka ku jira ayaa wakhtigii la doono ku dhawaaqaya STOPP, markaas ayaa dhamaan la istaagayaa oo qofkii bartanka ku jireyna waxuu tilmaamayaa meesha uu isleeyahay qof ayaa taagan. Haddii qof la tilmaamo, waxuu ka baxayaa wareega.
Qofka bartamaha ku jira ayaa mar kale oranaya SOCO (GÅ) ka dibna dhamaan waxaa lagu dhawaaqayaa soco.
Ciyaarta wey soconeysaa ilaa qofka bartanka ku jiraa uu dhamaan dadka tilmaamo.

<u>Soo xad saaxiib</u>
Kala qaybi dhamaan dadka ciyaarta ka qaybgelaya, kolka laga reebo laba qof oo wadajira , kuwaa istaaji wareega, qofna ka horaysii midka kale si ay u dhisaan gudaha ah iyo mid dibad ah. Dadka ku jira wareega dibada ah waxay u istaagayaan iyagoo gacmaha u deysan yihiin dhinacyada.
Qofkii aan haysan lamaane waxuu istaagayaa keligiisa ,waxuuna soo xadayaa saaxiib, isagoo ku dhawaaqaya magaca qofka taagan wareega gudaha.
Qofka magaciisa lagu dhawaaqay ayaa is degdeg ah ugu tegayaa qofkii u dhawaaqay. Qofka ka dameeya ayaa isku deyaaya inuu qabto isagoo si dhaqso ah gacmaha uga saaraya garabka, balse kama daba ordaayo.

<u>Saddex shey</u>
Dhamaan ka qaybgalayaashu waxay istaagayaan wareeg. Dhamaan waxay cod sare oo tammar leh ku oranayaa: ”Saddex shey!”,ka dib saddex goor ayey bawdada dharbaaxayaan,qof ayaa sii wadaya macanaha ereyga isagoo qofka xiga weydiinaya tusaale ahaan: ”... aad ku haysatid qolkaaga!”, Qofka ayaa kolkaa si dhaqsi ah ugu jawaabaya isagoo sheegaya saddex shey oo yaal qolkiisa.Ka dib ayuu markale ku dhawaaqayaa: ”saddex shey!” qofka ka jawaaba ayaa sii weydiinaya : ”... aad kabahaaga ku haysatid!”.
Ku baraaruji iney si degdeg ah u dhacaan, qofka kabihiisa waxa ku jira, qolka waxa yaal, uma baahna iney sax ahaadaan.

Mashinka dharka lagu dhaqo

Dhamaan qaab wareeg ah u istaaga, kolka laga reebo qof ciyaarta hogaaminaaya, qofkaas waxuu istaagayaa wareega bartankiisa.
Hogaamiyaha ayaa qof tilmaamaya waxuuna ku dhawaaqaya waxuun ka mid ah waxyaalaha soo socda:

MASHINKA DHARKA LAGU DHAQO!
Qofku waa inuu foororsadaa, jirka korena uu u dhaqaajiyaa qaab wareeg ah. Dadka ku dhow qofka labada dhinacba ayaa gacmaha u qaabayna sidii afar geesle weyn. Fiiri sawirka (Se bild 1).

CIYAARTA LA YIRAA! (BRÖDROST!)
Kolkaa qofka ayaa kor iyo hoos u boodaya, islamarkaasna waxuu leeyahay ”brödrost” marar badan. Dadka labada dhinac ugu dhow ayaa gacmaha ku fidinaya dhinaca qofka dhexda taagan. Fiiri sawirka ( Se bild 2).

CIYAARTA LA YIRAA! (ELVISP!)
Kolkaa ayaa qofku istaagayaa iyadoo uu gacmaha hawada kor u taagayo, oo la mid ah xarafka V. Dadka kuu dhow qofka ee labada dhinac ka xiga ayaa ku wareegaya garabka qaab u eg mashinka wax lagu qaso ee la yiraa (vispar). Fiiri sawirka ( Se bild 3).

Ka dib hogaamiyaha ayaa tilmaamaya qof cusub oo oranaya erey -amareed kale.

Haddii qof la gefo waxuu noqonayaa hogaamiye.

SAWIRKA 1
SAWIRKA 2
SAWIRKA 3

CAGAAR IFTIIN AH
Wakhtigii ciyaar tilmaameedka!

Hogaamiyayaasha ciyaarta ayaa soo saaraya kaar, kaasoo uu ku yaal mowduuc ka mid ah sharciga xuquuqda caruurtra, dadka ciyaaraya ayaa kolkaa tilmaan ahaan u sheegaya iyagoon hadlin.
Waddamada ayaa qoraya mowduuca ama qodobka la timaamayo midka uu yahay.
Hogaamiyayaasha ciyaarta ayaa waddamada ku wareegaya oo arkaaya jawaabtiina.
Ka feker in aadan tusin wadamada kale.
Nasiib wanaagsan!

Caruurta oo dhami waxay xaq u leeyihiin iney ka qayb galaan mudaaharaad nabadeed iyo kulamo.

Caruurta oo dhami waxay xaq u leeyihiin iney rumeeyaan Illaahi ay doonaan iyo haday rabaan in aanay waxba rumeynin.

Dhamaan caruurtu waxay xaq u leeyihiin dugsi hoose/dhexe.

Cidina ma taaban karto jirka caruurta haddii aanay iyagu raali ka ahayn.

Dhamaan caruurtu waxay xaq u leeyihiin iney waxyaalo badan ogaadaan iyagoo akhrinaaya wargeysyada, daawanaya Tv-ga, dhegeysanaya raadiyaha ama isticmaalaya Internet-ka.

Dhamaan caruurtu waxay xaq u leeyihiin iney ciyaaraan , nastaan, wakhti firaaqo ahna helaan.

Dhamaan caruurtu waxay xaq u leeyihiin nolol u gaar ah.Dadka waaweyn xaq uma laha iney akhriyaan buuga xusuus qorka ee caruurta , warqad, ama fariimaha danabaysan ee la isu diro.

Ma jirto cid iibin karta ama soo gadan karta caruurta.

Dadka waaweyn waa iney caruurta ka difaacaan waxii maandooriye ah, sida tusaale ahaan aalkolada iyo daroogada.

Caruurta oo dhami waxay xaq u leeyihiin iney helaan adeeg caafimaad.

CAGAAR MUGDI AH

War degdeg ah (Breaking news)

Ururka wadashaqeynta ka dhexaysa waddamada waxuu ku deeqayaa 200 000 lacagta (Barnoz), waddankaaga ayuu siinayaa si xaaladaha curuurtu usii wanaagsanaadaan.

Siyaasiyiinta wadanka deriskaaga ah ee Lindiosa ayaa soo saaray goàan 400 000 oo lacagta (Barnoz ) ugu deeqayaa waddankaaga si xaalada caruurtu usii wanaagsanaato.

Waddanka Adnama ayaa waxaa ku dhacay dhulgariir, ururka wadashaqeynta waddamada ka dhexeysa ayaa goàansaday in waddamada oo dhan caawinaad ka geystaan dhibta dhacday.Dhamaan waxay dhiibayaam lacag caruureed dhan 200 000 (Barnoz )

Waddanka Ayot, waxaa ka dhacay daadad waaweyn sanado badan, hadda khatar weyn ayaa jirta in waddankaaga dhibtaasi soo gaarto,sidaas darted waa inaad kharash gaaraya 400 000 (Barnoz) si aad u dhistaan meelo biyuhu maraan si khatarta loo yareeyo.

Siyaasiyiinta waddanka Leakim waxay doonayaan in waddamo badani meesha ka saaraan sharciga xuquuda caruurta .Ururka wadashaqeynta ka dhexaysa waddamada ayaa goàansaday in la idin siiyo 400 000 (Barnoz) si aad awood ugu yeelataan inaad joojisaan goáanka.

Bishii ugu damaysay waxaa dhacaayey dabaylo aad u xoog badan . Qaar badan oo ka mid fiilooyinka dabka hogaamiya ayaa baabaày, ururka wadashaqeynta waddamada ka dhexaysa ayaa ku tabarucay 400 000 ( Barnoz) si aad u dhistaan fiilooyin cusub oo karontada qaada.

Waddankaaga ayaa isugu yeeray shir weyn , kaasoo ay ka qaybgelayaan waddamo kale oo badan, halkaasoo dad waaweyn oo muhiim ah ay ka hadli doonaan xaalada caruurta.Waa inaad gelisaan kharash ah ilaa 200 000 (Barnoz) ee casariyaha shirka ah.

Qaraxa dhulka hoostiisa kasoo baxa (vulkanutbrott) ayaa ka dhacay waddan deris ah kaasoo dhaliyey in hawada wadankaaga ay wasakh noqoto. Waxaa la idinka rabaa inaad gelisaan kharash ah 200 000( Barnoz) eek u baxaya marada af-xirka.

Waxaa kor u kacay dixiriga waxyeeleeya baradhada (Potatismaskar) waxuu cunay oo burburiyey baradhadii aad beerateen.Waxaad u baahan tihiin inaad baradho kasoo iibsataan Lindiosa si aad isu bixisaan, waxay ku kacaysaa 200 000 (Barnoz).

Dab aad u weyn gubey dhinaca waqooyi ee dalkaaga, caruur badan ayaan helin adeegii caafimaad ee ay u baahnaayeen. Waxaad sidaas darteed u baahan tihiin inaad wadanka Lindiosa kasoo kireysataan dhaqaatiir idin caawina kuwaaso ku kacaya 400 000 (Barnoz).

Waxaa laga helay sun, cuntada iskuulka ee waddankaaga, taasoo caruurtu ku xanuunsanayaan.Waa inaad soo iibsataan cunto kale oo ku kacaysa 200 000 (Barnoz).

Bakhaarkiinii keydka daawada ayaa burburay,ka dib kolkii uu dab qabsaday, waa inaad soo iibsataan daawo cusub oo ku kacaysa ilaa 400 000 (Barnoz)

Ururka caalamiga ah ee la yiraa( Leken) waxuu xor u yahay inuu soo saaro, waxyaalaha caruurtu ku ciyaaraan sida goomaha la isku ruxo iyo meelaha laga soo taraaraxo, Waxuu idiinku deeqayaa tabarucaad dhan 200 000 (Barnoz) si aad caruurta waddankiina ugu samaysaan meelo wanaagsan oo ay ku ciyaaraan.

Dadka ku nool i Lindiosa waxay heleen sanduuq weyn oo ay ka buuxaan lacagta (Barnoz) kuwaasoo la duugay oo la qariyey ilaa waagii boqoradda Adnil ay dhimatay. Waxay doonayaan in caruurta waddamada kale xaaladoodu wanaagsanaato, waxay waddankaaga ugu deeqeen 400 000( Barnoz)

Waxaa la helay lafaha xayawaanka la yiraa(dinosaurieskelett), taasoo laga helay waddankaaga iyo waddan kale oo dhinaca bari idinka xiga. Dunida ayaa idinkaga iibsatay 200 000 (Barnoz).

Ururka wadashaqeynta waddamada ayaa ogaaday in siyaasiyiintiinu sanado badan ay lacagta cashuuraha musuqmaasuqeen.  Hadda waa inaad bixisaan  400 000 (Barnoz) oo siisaan ururka wadashaqeynta waddamada dhexdooda.